QIIMAYNTA WAXQABADKA KORMEERAHA GUUD

(Loo soo xigtay Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Dadweynaha Boston)

Dhukumiintiyada Tixraaca ah:

Qiimaynta shakhi ahaaneed ee Kormeeraha Guud Skipper SY 2022- 23

Warqada Ogaysiiska Qiimaynta shakhi ahaaneed ee Kormeeraha Guud Skipper SY 2022- 23

Qeybaha uu Diirada Saarayo Kormeeraha a Guud Skipper SY 2022-23

Hababka Hagitaan ee DESE

Magaca:	Kormeeraha Guud Mary Skipper
Taariikhda Dhammeystirka:	Ogosto 15, 2023
Waxa la dhamaystiray:	Quoc Tran, Xubnaha Guddiga Dugsiyada Boston
Nooca Qorshaha Macalin	Qiimaynta Kormeeraha guud, SY 2022- 2023

QEEXITAANADA DARAJOOYINKA

SI AAD AH WAX KU OOL AH (Ku dayasho mudan)	Waxqabadka ayaa aad uga sarreeyay filashooyinka iyada oo ay ugu wacan tahay tayada sare ee shaqada laga keensaday dhammaan dhinacyada muhiimka ah ee mas'uuliyadda, taasoo keentay guud ahaan shaqo tayeysan oo heer sare ah; iyo midood 1) waxaa ka mid ahaa dhammeystirka hadaf weyn ama mashruuc, ama 2) waxaa la sameeyey wax ku biirin aan caadi ahayn ama gaar ah oo lagu taageerayo hadafyada cutub, waax, ama degmo. Darajo siintan waxaa gaari kara shaqaale kasta in kasta oo aan badanaa la bixin.
WAX KU OOL AH (Karti Leh)	Waxqabadka wuxuu si joogto ah uga sarreeyay filashooyinka dhammaan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyo tayada shaqada guud ahaan waxay ahayd mid aad u sarreyso. Yoolalka sanadlaha waa la gaaray.
KOR USOO KACAYO (Karti Leh)	Waxqabadka wuxuu si joogto ah u gaaray filashooyinka dhammaan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyadoo mararka qaar ay suuragal tahay ka sarreynta filashooyinka, iyo tayada shaqada guud ahaan waxay ahayd mid aad u fiican. Yoolalka sanadlaha ah ee ugu muhiimsan waa la gaaray.
SI HOOSE WAX KU OOL AH (Ubaahan Hagaajin)	Waxqabadku si joogta ah ma u gaarin filashooyinka – waxqabadku wuu ku guuldarreystay inuu gaaro filashooyinka mid ka mid ah ama ka badan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyo/ama mid ka mid ah ama ka badan yoolalka sanadlaha ah ee ugu muhiimsan ma la gaarin. Qorshe horumarin xirfadeed ah oo lagu hagaajinayo waxqabadka waa in lagu xiraa, oo ay ku jiraan jadwallo, oona lala socdaa si loo cabbiro horumarka.
MA AHA WAX KU OOL (Laguma Qanci Karo)	Waxqabadka wuxuu si joogto ah uga hooseeyay filashooyinka inta badan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyo/ama horumar macquul ah oo ku saabsan yoolalka muhiimka ah lama sameynin. Hagaajin la taaban karo ayaa looga baahan yahay mid ka mid ah ama ka badan meelaha muhiimka ah. Qorshe lagu saxayo waxqabadka, oo ay ku jiraan jadwallo, waa in la dejiyaa oona lala socdaa si loo cabbiro horumarka.

HEERKA I: Hoggaaminta Waxbaritaanka

Hogaamiyaha waxbarashadu wuxuu kor u qaadaa waxbarashada iyo koboca ardayda oo dhan iyo guusha dhammaan shaqaalaha isagoo kobcinaya aragti wadaag ah oo ka dhigaysa waxbaridda xooggan iyo barashada mid udub dhexaad u ah dhigashada iskuulka.

Aagaga Gaarka ah ee Diiradda La Saarayo:

- 1-A Manhajka
- 1-D Qiimeynta Heerka
- 1-E Go'aan Qaadashada Xog Wargelisay
- 1-F Waxbarashada Ardayga 1-A Manhajka
- 1-B Waxbaridda
- 1- C Qiimeynta
- 1-D Qiimeynta Heerka
- 1-E Go'aan Qaadashada Xog Wargelisay
- 1-F Waxbarashada Ardayga

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Kala hormarinta iyo Dardar gelinta Waxqabadka Waxbarashada
- Xoojinta Helitaanka Barashada Shucuurta Bulshada
- Kordhinta La Xisaabtanka Xafiiska Dhexe iyo Dugsiyadeena labadaba

DARAJADA:

XXX	**SI AAD AH WAX KU OOL AH**
	WAX KU OOL AH
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

In ka yar hal sano oo u ka shaqaynayay hogaanka Nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Boston, Kormeeraha Guud wuxuu ku guuleystey inuu gaaro guulo dhowr ah oo muhiim ah marka loo eego qeybaha lagu qeexay heerkan.

Geynta jagooyinka hogaaminta shaqaalaha saxda ah, hababka waxbaritaan iyo tacliin loo siman yahay waxay noqotay mid u heli karo arday kasta. Intaa waxaa dheer, iyadoo si joogto ah loo hirgelinayo Qorshaha Istaraatiijiyada OMME, tirada araday barta Ingiriisiga ee helaya barashada Ingiriisiga ku haboon ayaa si muuqata u koradhay.

Sidoo kale, iyadoo la saadaalinayo wakhtiyada kama dambaysta ah ee la xiriirta soo gudbinta Qorshaha Hormarinta Nidaamka ee DESE, kooxo qorshayn kamid ah ayaa laga sameeyay dugsiyo kala duwan si ay u horumariyaan hab-dhaqanka loo dhan yahay ee dugsigooda iyada oo diiradda la saarayo u adeegida ardayda waxbarashada gaarka ah.

Marka la eego dadaallada shaqaalaynta shaaale iyo sii haysashada shaqaale, macalimiin cusub oo haysta ESL iyo/ama ruqsada waxbarashada gaarka ah ayaa la shaqaaleysiiyay si ay u dejiyaan tirada sii kordhaysa ee ardayda ku jirta kala soocitaanka. Dadaalada lagu shaqaaleysiiyo shaqaale laguna sii haysanyo macalimiinta waxbarashada luqadaha badan iyo dhaqamada badan ayaa socda.

HEERKA II: Maamulka iyo Hawlaha

Wuxuu kor u qaadaa barashada iyo koboca dhammaan ardayda iyo guusha dhammaan shaqaalaha isagoo hubinaya deegaan waxbarasho oo ammaan ah, hufan, oo wax ku ool ah, iyadoo la adeegsanayo kheyraad lagu hirgeliyo manhajka ku habboon, shaqaalaha, iyo jadwalka.

- 2-A Deegaan
- 2-B Maareynta/Horumarinta Shaqaalaha
- 2-C Nidaamyada Jadwaleynta iyo Maareynta Macluumaadka
- 2-D Sharciyada Ashaxa iyo Xeerarka
- 2-E Nidaamyada Maaliyadda

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Hagaajinta Wada-xiriirada Gudaha iyo Dibedda ee lala yeesho Qoysaska iyo Shaqaalaha
- Hagaajinta Hawlaha iyo Xaqiijinta Badbaadada Ardayga

xx	**SI AAD AH WAX KU OOL AH**
	WAX KU OOL AH
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

Iyada oo sanado badan oo waayo-aragnimo ah u leh maaraynta nidaamka dugsiyada dadweynaha, Kormeeraha guud waxay soo bandhigtaa aragti fiican iyo sida loo yaqaan marka ay dadka muhiimka ah ay geyso door ku haboon si ay u fuliso oo ay u horumariso qorshaheeda guusha. Waa wax lagu farxo in la qiro in shaqaalaha sare ee Kormeeraha guud ay si fudud u heli karaan diyaarna u yihiin inay caawiyaan xubin kasta oo Guddiga Dugsiga ah marka la codsado.

Marka la eego Qorshaha Hormarinta Nidaamka, xoojinta natiijooyinka la taaban karo ee ardayga ayaa ah cabir muhiim ah oo leh cabirro si cad loo filayo. Qorshe shan sano ah oo diiradda lagu saarayo badqabka Dugsiga iyo Ardayga, Gaadiidka, Xarumaha, iyo Shaaalaha ayaa la habeeyay, lana fuliyay, si dhowna loola socday.

Kormeeraha guud waxa kale oo uuhirgaliyay shaxan cusub urur ahaaneed oo ay u xilsaartay ku xigeenada Kormeerayaasha si ay u kormeeraan oo ay u sameeyaan warbixinnada heerka caadiga ah iyada oo ku saabsan Waxbarashada, Hawlaha, Sinaanta, iyo Horumarinta Qoyska iyo Bulshada. Hab gobol ahaan ayaa sidoo kale la hirgaliyay si dib loogu eego xogta ku salaysan dugsiga iyo in taageero loo fidiyo hogaamiyayaasha dugsiga, taas oo keentay in 70% hogaamiyayaasha dugsigu ku qanacsan yihiin ka jawaabista xafiiska degmada. Waxa xusid mudan sidoo kale gorgortanka guusha leh ee Kormeeraha guud iyo heshiiska lagu gaaray dhammaan 18-kii qandaraasyo shaqaale ee jira ee lala galay ururada kuwaas oo ka caawiya BPS inay sii wataan xoog shaqaale aqoon leh.

Marka laga hadlayo xarumaha, waxa markasta diirada la saaray abuurista jawi aan ku habboonayn waxbarashada ardayda laakiin sidoo kale badqab leh. Kadib dib u eegista iyo talooyinka ay sameeyeen Golaha Dugsiyada Magaalada (CGCS), Xafiiska Maareynta Degdegga ah ayaa la sameeyay si loo fuliyo talooyinka CGCS. BPS hadda waxay leedahay dhammaystir buuxa oo ah Takhasuslayaasha Badqabka. Intaa waxaa dheer, Isku-duwayaasha Isku xirka Bulshada ayaa sidoo kale la shaqaaleysiiyay si ay ula shaqeeyaan hogaamiyayaasha

dugsiga iyo bulshada si ay u bixiyaan diirada firfircoon ee helitaanka kheyraad iyo taageerada ku haboon baahiyaha gaarka ah ee ardayga. Intaa waxaa dheer, Takhasuslaha Isgaarsiinta Gudaha ah ayaa la shaqaaleysiiyay si loo hubiyo habraac isgaarsiin ahaaneed oo sax ah ee qoysaska haddii ay dhacdo shilalka badqabka la xiriira. Marka la eego Gaadiidka, degmadu waxay si buuxdo u shaqaalaysiisay darawaliin bas marki ugu horeysay tan iyo kahor cudurka faafa ee COVID-19. Qandaraas cusub oo lala galay Transdev kaas oo bixiya maaliyad dheeraad ah oo lagu horumarinayo waxqabadka iyo waxyeelada qandaraaska kharashkeeda qabo ee waxqabad la'aanta, oo la socota hadafyada gaadiidka ee ku saabsan ardayda BPS, ayaa la gaarey. Guud ahaan, waxqabadka Kormeeraha guud ee hoos yimaada heerka "Maaraynta iyo Hawlgalinta" degdega ah waa mid aad waxtar u leh.

HEERKA III: Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada

Waxay kor u qaadeysaa barashada iyo koritaanka dhammaan ardayda iyo guusha dhammaan shaqaalaha iyada oo loo marayo iskaashi wax ku ool ah oo lala yeesho qoysaska, ururada bulshada, iyo saamileyda kale ee taageera howlgalka dugsiga iyo degmada.

- 3-A Ka Qaybgalinta
- 3-B Wadaagista Mas'uuliyadda
- 3-C Isgaarsiinta
- 3-D Walaacyada Qoyska

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Horumarinta Dhaqanka Qoyska iyo Ka qaybgalka Bulshada ee Saxda ah
- Hagaajinta Wada-xiriirada Gudaha iyo Dibedda ee lala yeesho Qoysaska iyo Shaqaalaha

	SI AAD AH WAX KU OOL AH
xx	**WAX KU OOL AH**
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

Arimaha soo noqnoqda ee qeybta Ka Qaybgalka Qoyska iyo Bulshada ayaa dhibaato ku keenay Dugsiyada Dadweynaha Boston tan iyo wakhtiyadii hore. Inkasta oo qaabab kala duwan oo isgaarsiin ahaaneed iyo horumarin/kobcin la sameeyay muddo kadib, daah-furnaanta iyo sinnaanta ayaa weli ah qaylo dhaan inta badan laga maqlo daneeyayaasha, u oleleeyayaasha bulshada, waalidiinta, iyo ardayda. Natiijo ahaan, kalsoonidii waalidku ku qabeen nidaamka dugsiga iyo maamulkiisa ayaa si aan wanaagsanayn meesha looga saaray. Intaa waxaa dheer, waa in la ogaadaa, in, tobankii sano ee la soo dhaafay, qayb kamid ah sababaha dhibaatadan qalafsan ay tahay isbeddelka joogtada ah ee hogaanka degmada, la'aanta shaqaale u tababaran, iyo carqaladaynta dheer ee uu sababay Cudurka Faafa ee COVID.

Iyadoo ogsoon muhiimada ay leedahay wax ka qabashada arimaha la xiriira hufnaanta, Kormeeraha guud waxay xoojisaa taageerada Golaha Dugsiga, shaqaaleysiiya xiriiriye bulsho ahaaneed oo dheeraad ah, wuxuuna siiyaa tababar shaqaalaha dugsiga iyo qoysaska. Habraacyada isgaarsiin ahaaneed ee cusub lana hormariyay iyo habraacyada wadaagga macluumaadka ayaa la hirgeliyay. KHADKA CAAWINTA BPS ayaa la sameeyay iyadoo ah xarunta adeegga macaamiil ahaan si aan u garab istaagno qoysaska/mas'uuliyiinta raadinaya macluumaad ku

saabsan degmada. Tan iyo markii la bilaabay, khadkan caawinta luqadaha badan wuxuu u adeegay tobanaan kun oo su'aalo la xiriira dugsiga oo ka yimid dadweynaha. Intaa waxa dheer, Kormeeraha guud wuxuu ku dadaalayaa inuu si wada jir ah ula shaqeeyo iskaashatada bulshada oo dhawaan la aqoonsan doono si loo horumariyo oo loo hirgeliyo barnaamijka Hagitaanka Waalidka kaas oo diiradda saari doona dhisidda kalsoonida iyo xirfadaha waalidiinta si ay si firfircoon uga qayb qaataan waxbarashada caruurtooda.

Kormeeraha Guud wuxuu marar badan la kulmay Golaha La-talinta Ka qaybgalka Bulshada, St Stephen, Kooxda Hoggaanka Waalidka, Golaha Waalidka Magaalada dhan, SPEDPAC iyo DELAC. Marka la eego iskaashiga bulshada/daneeyayaasha, Kormeeraha guud wuxuu la shaqaynayaa Rugta Ganacsiga Boston si uu uga qaybgaliyo ganacsiga iyo bulshooyinka warshadaha ka qaybgalka dhaqaalaha iyo taageerada waxbarashada ku salaysan shaqada ee ardayda.

Marka la eego walaaca joogtada ah iyo kuwa soo noqnoqda ee ku saabsan sinaanta, waxa xusid mudan qiimayntayda in dhammaan mashaariicda, talooyinka xeerarka, iyo hindisayaasha la xiriira dugsiga ee hoos yimaada dalada Duqa Green New Deal, soo jeedinta iyo horumarinta Kormeeraha guud, ay wadaan laftooda si fiican loo baadhay oo xaqiiqa la taageeray Falanqaynta sinnaanta. In kasta oo aan aqoonsanahay in xadidaadda iyo cabirrada sinaanta ay si kala duwan u arkaan shakhsiyaad kala duwan, waxaan si adag u aaminsanahay in falanqaynta sinaanta ee taageeraya mashaariicda baaxada leh ee kala duwan iyo hindisayaasha ay horumariyeen Kormeeraha guud iyo shaqaalaheeda ay sii wadi doonto caqabad kasta oo sharci ah haddii ay dhacdo noocan oo kale ah dhacdo. In kasta oo aan anigu aaminsanahay, sinaanta ayaa weli ah mid ka mid ah sababaha muhiimka ah ee walaaca ay qabaan xubnaha dadweynaha ee ka soo horjeeda dhawr mashruuc oo uu soo jeediyay Kormeeraha Guud.

Dhammaan dadaaladeeda socda ee hoos yimaada heerkan “Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada” waa inuu damaanad qaadaa qiimayn Aad u Wanagsan, iyada oo ay maqan tahay cabashada dadwaynaha ee soo noqnoqda iyo baahida hufnaanta iyo/ama sinaanta ee lagaga dhawaaqay Dhagaysiyada Dadweynaha ee Guddida Dugsiga. Waxaan u hogaansamaa qiimeynta Wax ku oolka ah ee Kormeeraha guud ee heerkan anigoo rajaynaya inaan maqlo baahida yar ee loo qabo Hufnaanta iyo Sinaanta ee dadweynaha ee horay u socota.

Heerka IV: Dhaqan Xirfadeed

Wuxuu dallacsiiyaa guusha ardayda oo dhan isagoo kobcinaya oo sii wata dhaqanka dugsiga ee dhaqanka ka tarjumidda, filashooyinka sare, iyo waxbarashada joogtada ah ee shaqaalaha.

- 4-A Balanqaadka Heerarka Sare
- 4-B Aqoonta Dhaqan ahaaneed
- 4-C Isgaarsiinta
- 4-D Waxbarashada Joogtada Ah

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Kordhinta La Xisaabtanka Xafiiska Dhexe iyo Dugsiyadeena labadaba

xx	**SI AAD AH WAX KU OOL AH**
	WAX KU OOL AH
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

Kormeeraha guud waxay u dhaqantaa si tusaale ah dhamaan dhageysiga dadweynaha ee Guddiga Dugsiga, kulanada fulinta, tababarka la xiriira dugsiga, iyo dib isugu imaatinada. Aad ayaan ugu riyaaqay oo aan uga mahadnaqay helitaanka iyo akhrinta qoraalka Kormeeraha guud ee ay noo soo dirtay dhawr maalmood kahor dhegaysi kasta. Kormeeraha guud ayaa markasta timaada kulanadan iyadoo si wanaagsan isugi soo diyaarisey oo ku hubaysan sharraxaad sax ah oo ku wajahan su'aalaha xubnaha Guddiga. Marka loo baahdo, waxay u wakiilataa shaqaalaha sare jawaabaha takhasus aqoon ahaaneed u baahan.

Marka la eego isgaarsiinta, Kormeeraha Guud waxay samaysay kooxo shaqo isweydaarsiyo gudaha ah si markaa dhammaan saamileyda muhiimka ah iyo waaxaha ay qayb oga ahaadaan qorshaynta iyo fulinta shaqada. Midani waxay yaraynaysaa caqabadaha shaqada iskaashiga ah. Si looga jawaabo dhacdooyinka halista ah, heerar isgaarsiin ahaaneed ayaa laga hirgeliyay dugsiga iyo degmada labadaba iyo ogeysiisyo baaxad leh oo saameeya bulsho weynta BPS. Kormeeraha guud waxay samaysay habraac qoran si aan u xaqiijino qof walbo inuu helo hal fariin oo laga siman yahay, oo lagu helo luuqada hooyo ee la doorbido, kana timaado degmada ee aysan ka imaan il kale.

Iyada oo dhammaan aaladaha isgaarsiinta gudaha uu maamulaha fulinayo, waxaa la dareemi karaa in dhammaan shaqaaluhu ay dareemayaan in la qiimeeyo oo ay qayb ka yihiin kooxda. Dadaalka lagu kobcinayo iyada iyo shaqaalaha takhasuska leh, Kormeeraha guud iyo shaqaalaheeda hogaaminta udub dhexaadka u ah waxay ka qaybqaateen Mashruuca Hogaaminta Waxbarashada Dadweynaha ee Harvard (PELP) iyo dhowr kulan iyo tababaro ay marti galiyeen Golaha Dugsiyada Magaalada (CGSC). Intaa waxaa dheer, Kormeeraha guud wuxuu bixiyay dhamaan shaqaalaha shaxan urur ahaaneed oo leh qaab-dhismeed cad oo door ah iyo mas'uuliyado leh mudnaan gaar ah oo kaabaya waxa shaqaaluhu ku shaqeynayeen. Kormeeraha guud waxa kale oo uu sameeyaa kulamo maalinle ah oo ay la yeelato Ku Xigeenadeeda iyo Madaxa Shaqaalaha, kulamo todobaadle ah oo ay la yeelato Madaxda Waaxaha, iyo bishiiba mar Kooxda Fulinta. Dhammaan kormeeradan iyo qiimayntan dhow ma aha oo kaliya in la hubiyo in wakhtiyada kama dambaysta ah la daboolay laakiin waxay gacan ka geystaan dhisidda xiriir adag oo lala yeesho iyo sidoo kale shaqaalaha dhexdooda.

Marka la eego hogaaminta goobta dugsiga, Kormeeraha guud wuxuu dib u habayn ku sameeyay qandaraaska maamulaha dugsiga isaga oo ujeedadiisu tahay soo jiidashada iyo sii haynta hogaamiyayaasha dugsiga. Qandaraaska la hormariyay wuxuu ku baaqayaa kordhinta mushaharka aasaasiga ah, bixinta fursado waxbarasho iyo xirfadeed oo dheeri ah, iyo gunooyin sii haysashada shaqaale oo lagu daray. Natiijo ahaan, tirada is-casilaadda hogaamiyaha goobta Dugsiga ayaa si muuqata hoos ugu dhacday sanadkan. Marka la eego qandaraaska cusub, hogaamiyeyaasha dugsiyadu waa inay fuliyaan Qorsheyaal Tayo leh ee Dugsi oo leh mudnaanta waxbarashada, Dhaqanka iyo Cimilada, iyo soo xaadiritaanka.

Kormeeraha guud wuxuu muujiyay awooda uu ku sameeyo dhaqan xirfadeed iyo jawi shaqo oo BPS halkaas oo faa'iidooyinka waxbarashadu ay hubaal ahaan dib ugu soo noqon doonaan ardayda. Qiimayn Aad Waxtar leh ayaa halkan lagu arkay.

DARAJADA GUUD (Waxay eegtaa horumarka xagga yoolalka iyo qeybaha waxqabadka)

XX	**SI AAD AH WAX KU OOL AH (Ku dayasho mudan)**
	WAX KU OOL AH (Karti Leh)
	KOR USOO KACAYO (Karti Leh)
	SI HOOSE WAX KU OOL AH (Ubaahan Hagaajin)
	MA AHA WAX KU OOL (Laguma Qanci Karo)

KALIYA QIIMEYNTA WAXBARASHADA: HEERARKA DARAJOOYINKA
(Geli 'X' sanduuqa darajada ku habboon ee heer kasta)

E	P	NI	U	
x				**Heerka I: Hoggaaminta Waxbaritaanka**
XX				**Heerka II: Maamulka iyo Hawlaha**
	X			**Heerka III: Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada**
XX				**Heerka IV: Dhaqan Xirfadeed**

Qorshaha Horumarinta Shaqaalaha (EDP)

Aqoonso oo qeex 2-3 aag oo awood ay ka jirto iyo 2-3 aag oo sii wadida koritaanka ah oo ku saleysan qeybaha kore, iyo sidoo kale sida aad u timid meelahaan.

Dhinacyada lagu wanaagsan yahay	Dhinacyada sii wadista koboca
Xirfadaha Maamul	ka qeybgalka bulshada
Dhaqan ahaan haboon	
iyadoo loo adeegsanayo isu-diyaarin	